



81 Angas Street, Adelaide
South Australia 5000
Tel: (08) 8206 8900
Wicitaan bilaash ah: 1800 773 520
Fax: (08) 8223 2218
Web: www.sttars.org.au



STTARS waxay caawisaa dadka asal ahaan ka soo jeeda qaxootiga ama soogalootiga ah ee la kulmay jirdir ama dhib soona arkay ee ay sababeen dhibitaan, caddowtinimo dagaal, xabsiyid aan sharci ahayn ama dagaal.

STTARS waxay siisaa kooxaha ama shakhsiyaadka la tallin, taageero iyo u doodis, uduugitaan daaweyneed iyo daaweynta dabiiciga ah ee kale.

Si aad cid ugu soo gudbiso ama ballan aad u sameyso ka wac STTARS 8206 8900 inta u dhaxeysa 9.00 subaxnimo iyo 5.00 galabnimo Isniin iyo Jimce.

STTARS waa urur aan dawli ahayn, oo aan faa'iido doon ahayn ee aanan cidna la lahayn xiriir diimeed ama mid siyaasadeed. Waxaan adeeg siineynay ka soo samatabaxayaasha dhibka iyo jirdilka laga soo bilaabo 1991. Waxaan xubin ka nahay Fikrad isweydaarsiga Adeegyada Australiya ee loogu talagalay dadka ka soo samatabaxay Dhibka iyo Jirdilka.

Wac STTARS haddii aad asal ahaan ka soo jeedo qaxooti ama soogalooti oo aad kala kulanto:

Dhib hurdada, dareen ah inaad ka go'an tahay jirkaaga, qarow habeenada, welwel iyo cabsi ku soo wajahda, murugo iyo farxad la'aan dheer oo xooggan, xannaaqa ama danbiile ahaan dheeraada oo xoog badan, farxad la'aan soo noqnoqota ama xusuus cabsi leh, xusuusta oo kaa lunta iyo dareen qiimo inaad lahayn ah.

Ama inaad nafsadaada ku aragto:

Iska dhawrida xaallado ku xusuusiya waxyaalahaad soo martay, adoo dareemaya inaad ka faquuqan tahay dadka kale , kuwa kalena aan ku kalsooneyn, aan awoodeyn inaad dareenkaaga wax u soo jeediso, si joogta ah inaad uga fekerto waxyaalo soo noqnoqda, badanaa dareemaya qof kacsan oo kale, oo iska xannaaqa sabab la'aan, dareemaya inaad dadka ka fog tahay mar aad isu dhaweydeen iska ururinta saaxiibada iyo nashaadka bulshadeed.

STTARS waxay bixisaa turjumaano.

Haddii aad u baahan tahay inuu turjumaan nala soo xiriiro wac 131 450.

STTARS waa wax qarsoon.

Taas micnaheedu waxaa weeye uma gudbin doonto wax macluumaad ah oo adiga kugu saabsan bannaanka STTARS ilaa aad adigu ogolaato.

STTARS waa bilaash.

Taas micnaheedu waxaa weeye wax lacag ah kuguma joogi doono inaad isticmaasho adeegeena.

Sidii aad u heli lahayd STTARS

81 Angas Street, Adelaide

South Australia 5000

Tel: (08) 8206 8900

Wicitaan bilaash ah: 1800 773 520

Fax: (08) 8223 2218

Web: www.sttars.org.au

Ku safar bas, tareen ama taraam:

Soo raacida gaadiidka dadweynaha waa waxa ugu sahlan ee aad ku iman kartid STTARS ee Angas Street iyo weliba basas badan ayaa istaaga Victoria Square. Labadaba 99c City Loop bas ka bilaashka ah iyo Taraamka Adelaide (oo bilaash ku ah magaaweynta gudaheeda) waxay istaagaan Victoria Square isagoo ka soo tegaya Saldhiga Tareenada Adelaide.